



U.S. Department of Justice Community Relations Service
(Adeegga Xariirka Bulshada ee Waaxda Cadaalada Maraykanka)

La Shaqaynta Adeegga Xariirada Bulshada (CRS) inta lagu jiro aafada caabuqa COVID-19 Su'aalaha Badanaa Nala Waydiiyo

Su'aasha: Waa maxay CRS?

CRS waa wakaalada keliya ee maxaliga ah ee golaha wakiiladu u xilsaaray inay ka caawiso bulshooyinka xalinka iskudhacyada ku salaysan sida dhabta ah ama qiyaasta isirka, midabka, asalka dhuleed, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, dookha galmada, diinta, iyo naafada. CRS maaha wakaalad danbi baaris ama dacwad oogis, mana lahan wax awood sharci fulin ah. Dhammaan adeegyada CRS waa kuwo qarsoodi lagu baxsho waxaana si bilaash ah loo siiyaa bulshooyinka. CRS waxay bixisaa afar adeeg: fududaynta wada hadalka, dhex-dhexaadin, tababar, iyo talo bixin. Adeegyadaan ayaa ka caawinaaya bulshooyinka ay colaaduhu ka jiraan kor u qaadista awoodooda si ay qaab madax banaan uga hortagaan una xaliyaan rabshada imaan kara mustaqbalka.

Su'aasha: Adeegga CRS ma shaqaynayaa inta lagu jiro aafayinka cudurka COVID-19?

Haa. CRS waxay sii wadaa inay fuliso shaqadeeda muhiimka ah waxayna sii shaqaynaysaa mudada lagu jiro aafada COVID-19. CRS ayaa hadda kala shaqaynaysa bulshooyinka xal u helida dhacdooyinka la xariira aafada cudurka iyo kuwa kale ee ku salaysan fikradaha khaldan iyo danbiyada nacaybka si waafaqsan masuuliyada wakaalada. Kooxda CRS oo ka kooban khubarada heshiisiinta ayaa lagu heli karaa khadka taleefanka iyo oonleenta ayadoo la adeegsanaayo shirarka maqalka iyo muuqaalka ah, shirka khadka taleefanka, iyo tababarada oonleenta ah si ay ugu adeegaan bulshooyinka dhammaan 50 gobal iyo dhulalka Maraykanka kala jooga.

Su'aasha: Maxay CRS samaysay si ay u caawiso bulshooyinka inta lagu jiray aafada COVID-19?

CRS waxay u taagan tahay xaqiijinta in bulshooyinku helaan adeegyadeena xataa inta lagu jiro xaaladaha adag. Halkaan ka akhri tusaaleyaasha sida CRS ay u caawisay bulshooyinka intii lagu jiray aafada cudurka: [justice.gov/crs/highlights/covid-19](https://www.justice.gov/crs/highlights/covid-19).

Su'aasha: Waa maxay noocyada adeegyada oonleenta ah ee CRS bixiso?

Inkastoo inta badan shaqada CRS ay badanaa tahay mid kulanno toos ah lagu fuliyo, CRS sidoo kale waxay bixisaa adeegyada khadka oonleenta ama taleefanka. Adeegyadaan waxaa ku jira fududaynta wada hadal oonleenta ah, kulannada bulshada, iyo tababaro oonleenta ah oo xog ka siinaaya kooxaha bulshada iyo saamileeyda kale habraacyada iyo khayraadka soo sheegida danbiyada ku salaysan nacaybka, waxayna taageeri karaan abuurista qorsheyaasha shaqada oo diirada saaraaya dhacdooyinka ku salaysan fikradaha khaldan iyo kahortaga iyo gurmada danbiyada ku salaysan nacaybka. Adeegyada dheeraadka ah waxaa kamid ah talo bixin iyo wadaagista farsamooyinka ugu fiican.

CRS waa wakaalad kamid ah the Department of Justice (DOJ) taasoo sharcian u xil saaran fulinta sharciga Title X ee Xaquuqda Aadanaha oo soo baxay 1964 iyo sharciga Matthew Shepard iyo James Byrd, Jr., ee Kahortaga Danbiyada ku salaysan Nacaybka oo soo baxay 2009 si ay ugala shaqayso kooxaha bulshada xal u helida dagaallada bulshada loogana hortago gurmada looga fidiyo danbiyada nacaybka ku dhisan ee ka dhasha fikradaha khaldan ee laga haysto isirka, midabka, asalka, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, dookha galmada, diinta, iyo naafada.

Waxaa intaas dheer, CRS waxay qabataa shirarka waxbarashada oo loo qabto tababaro oonleen ah ahaan si xogta loola wadaago tiro badan oo saamileey ah si xariir ah:

▼ **Shirka dhacdooyinka Eexda iyo Danbiyada Nacaybka ku salaysan**, ee ay fududayso CRS, ayaa kulmiya booliiska maxaliga ah iyo kuwa federaalka iyo ururada bulshada si ay uga doodaan isdhaafsiga qaabab looga hortago looguna gurmado dhacdooyinka eexda ku salaysan iyo danbiyada nacaybka ka dhasha. Shirkaan wuxuu sidoo kale fududeeyaa isdaafsiga xogta wuxuuna adkeeyaa xariirada u dhexeeya saamileeyda.

▼ **Shirka Difaaca Goobaha Cibaadada** wuxuu baxshaa qaababka ugu haboon oo looga caawin karo bulshada inay ka difaacaan goobaha cibaadada khataraha imaan kara. Shirku wuxuu kulminayaa saraakiisha booliiska deegaanka, kuwa gobalka, iyo federaalka iyo ururada diinta si looga wada hadlo bixinta xog iyo khayraad ku aadan sharciyada danbiyada nacaybka, xaaladaha dilalka toogashada ah, iyo amaanka rasmiga ah ee dhismeyasha diinta.

Su'aasha: Sidee ayaan ula xariirayaa shaqaalaha CRS?

Si aad ula xariirto CRS, fadlan iimeel u dir askCRS@usdoj.gov. Fadlan ku sheeg iimeelkaaga gobalka ama deegaanka Maraykanka ee aad dagan tahay ama adeegyada aad ka doonayso. Khubarada heshiisiinta ee CRS ayaa jooga 10 xafiis oo goballada ku kala yaala iyo afar xafiis oo wareegta kana hawlgala dhammaan dalka. Xafiisyada rasmiga ah waxay ku yaalaan Boston, New York City, Philadelphia, Atlanta, Chicago, Dallas, Kansas City, Denver, Los Angeles, iyo Seattle, ayagoo xafiisyada guur-guura ka shaqeeyaan Miami, Detroit, Houston, iyo San Francisco.

Su'aasha: Xagee ayaan ka helayaa khayraadka DOJ ee ku aadan dhacdooyinka ka dhasha fikradaha khaldan iyo kahortaga iyo gurmada danbiyada nacaybka ku salaysan?


Booqo bogga Xarunta Khayraadka ee DOJ CRS si aad u hesho muuqaallo tababar, waraaqaha xogta, tusmooyinka dhex-dhexaadiyaasha, iyo warbixinnada sanad kasta adoo galaaya www.justice.gov/crs/crs-resource-center. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan kahortaga iyo gurmada danbiyada nacaybka ku salaysan, booqo www.justice.gov/hatecrimes.

Su'aasha: Xagee ayaan ka helayaa jawaabaha cusub ee su'aalaha ku saabsan COVID-19?

Si aad u hesho xogtii ugu danbaysay ee ku aadan korona fayraska, booqo Xarunta Kahortaga iyo Xakamaynta Cudurka (Centers for Disease Control and Prevention (CDC) ood ka helayso www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/faq.html.

Meesha aan ka Shaqayno ▼

- New England
- Waqooyi-bari
- Atlantiga-Dhexe
- Koonfur-bari
- Galbeedka-dhexe
- Koonfur-galbeed
- Dhexda
- Buuralayda
- Galbeedka
- Waqooyi-galbeed
- Saraakiisha Goobta Shaqada
- Saraakiisha Gobalka
- Xafiiska CRS ee Goobaha Shaqada



Hel adeegeena, nagu xirnoow ▼

www.justice.gov/crs

 [facebook.com/DOJCRS/](https://www.facebook.com/DOJCRS/)

 [@DOJ_CRIS](https://twitter.com/DOJ_CRIS)

 askcrs@usdoj.gov

 202.305.2935